

Bal maxaa diyaanada

Gabaryahay ku dabadhigay

Farmashiye daawada Dadku uu ka iib sadoo
Aartiste door ihi Al-Islam ku daabacay
Dorraad mar aan dhexjoogaa Gabar qurux daraadeed
Daymada wejiga hore Daa'uus la moodaa
Dalaq iigu soo tiri
Salaan debeansan dabaded Dawadaas ma haysaa
Ayay tiri dukaankiyo Ninka daaska gadayow
Dubkeeday cawarayoo daymada jalleecada
Waxaba kulama daahine Durbadiiba waxan iri
Haddii aan ditor qorin Qof kastoo dalbanayaba
Degdeg ugama iibshoo Lacag daalib maahiye
Doonisteeda garataye waxa ay dawaysiyo
Difeetada ay leedahay Ma taqaan dawadatani
Ditor anigu maahiyo Waxa ay dawaysiyo
Difeetada ay leedahay Dani igama haysoo
Haddaad adigu diiddana Duul iga gadaayoo
Doonaaya lacagtaan Daafaha magaalada
Degdeg uga helaayaa Ayay ugu danbayntii
Jawaab diirran igu tiri
Dibna kalafurkeedii Ilkeheeda dabarka leh
Inaan deris ahayn beri Intii aan dareemaan
Dabadeed waxaan iri Dadkaas kaa gadaayaa
Iyagiyo dantoodee Yaynaan taas ku daahine
Horta sow dalaystii Ina Daahir maahayn?

Dabcan haah ayay tiri Iyaduna docdayday
Kaftan diirsimaad loo Waxay debeansan igu tiri
Dadka waysu badinaye Miyaa lays dafirayaa?

Daqiiqada yar gudohood Dib inta u fekerey-baan
Dabaded waxan iri Dalays waa runtaayoo
Ilaa dalandalkaagii Dadka waysu badinoo
Diraacdii dhoweydee Duunyadu baxaysana
Dhiirran dacalladeedi Waataan ka derisnaye
Dubkaan kugu aqiin iyo Hadmuu diirki kaa kacay?

Intay dib u dhaqaaqdoo Hadba doc iga eegtay
Durbadiiba waxay tiri Caku waa danbaysaa
Beledkaad dorraad timi Sowtii dad-hore-yiri
Doqon iyo habeen baa Madow loogu dawgalay
Dubkaan aan caddaystana Daliilkiisi waa kaas!!!!

Dahabiga afkayga ah
Ayaan deeto waxan iri
Daawooyin lagu daray
Dushaadii marmarisoo
Dayax soo baxaayiyo
Waagoo dillaaciyo
Dushaadii la moodyoo
Ina daahir maahide
Gabaryahay-ku-dabadhigay?

Intii aan dibnaha furay
Gabaryahay diyaaniyo
iyo durunafaa baad
Dubka sare caddaysoo
Cadceed dacalka dhigatiyo
Daliig qaanso roobaad
Dalaystaan aqiin iyo
Balmaxaa diyaanada

Caku loonka doorsama
Deeq laysa siiyiyo
Diinaarka carabtiyo
Alla dahabsanaayaa!!!!
Oo doori kugu yiri

Dubkaagi madobaa
Deyn lays amaahshiyo
Doollar laguma helayee
Iblays baase kugu diray
Raggaa kaaga didayee

Dabcigiyo wanaaggii
Dubkii uu Ilaahay
Haddaad diiddey oo tiri
Ayaan doonanaayaa
Waa kuu damiin-nimo

Daayin kuu sameeyiyo
kuu doortay adigaba
Mid kaloo ka doorroon
Diintaadan baranoo

Haddaad calafka doontoo
Dubkoo layska qaadana
Dadaal laguma gaaree
Caku ways dullaysaye
Arooskiinna dabaded
Deriskiyo xigaalkuna
Dabka yaa bal kuu shidi?
Waxa kaaga sii daran
Dan haddaad ka leedahay
Duqu gaari malahoo
Ayaa duhurki kuu socon?
Waxaa kaaga sii daran
Dakharkii ku gaaraa
Xaggeed daawo uga heli?
Waxaa kaaga sii daran
Majihii ka deysaaye
Qaybina daruur tahay
Dadku inay arkaayaan

Xoog ku daalibaysiyo
Huraa loo diyaarshoo
Waa kuu damiir xumo
Adigiyo duqaagii
Dadku idinka kala tegey
Laguu daayey hawshii

Daafaha magaalada
Qorraxduna dab ay tahay
Danyar reerku weeye

Haddaad ruux`dagaashaan
Dedgdeg uma bogsanayee

Wejigii dawaeysoo
Dubkaagoo ah kalakaan
Inta kalena dugul tahay
Ma dafiri karaysaa?

Waxa kaaga sii daran
Dayax soo baxaayiyo
Dibnahaaga madwgii
Dadku yuu la yaabine
Waxa kaaga sii daran

Dubka dhabanku weligii
Daruur haw ekaadee
Waakaa ku daahane
Maxaan kaga daboolnaa?
Dedgdeg midu u geeyoo

Isaguna difeetada
Damanaha ma sheegine
Dabcigiyo aqoontiyo
Dubka walalacdiisaas
Huraa looga soo digey
Waxa kaaga sii daran
Iyadoo lagu diray
Aan durunafaa iyo
Diyaanadi ad sidatana
Dadka waxad dhexjoogtoo
Danabkeennu guursdey
Toddobaadyo dabadood
Inay daamakaagii
Dogoba yeelanaayaan
Furuqi la dabarjaray
Daawaan is mariyana
Maygu diiddan tahay taas?

Dib ka qoomameeyiyo
Haddii aan dadnimadiyo
Loo bogin duntaadii
Raggu dooni maayoo
Anna waa ku sii daray
Docda reerka xididka ah
Oo halkay degaanniin
Daawooyin lagahelin
Kaa dabargo' ay tahay
Waa dahab la mooddi
Duqdu ay tiraahdaba
Dubkaagii wacnaa iyo
U ekaa daruuruhu
Deriskuna dhehaayaan
Miyaa dunida soo galay
Dibnaha aadan marin Karin

Waxaa kaaga sii daran
Diinta kuma bannaanee
Degdeg toobad soo celin
Kaa daayo mooyee
Mar ay duuli ma ogine
Maw dulqaadanaysaa?

Midabkoo la doorshaa
Haddii adan danbowdaye
Inuu daayin Eebbuhu
Naftu waa dabayloo
dabka naarta aakhiro

Illeyn dhagax dixeed iyo
Isagays-ka daalaye
Qalbigeeda kuma duxin
Illeyn diiddey taladee
Qori mayso diintuye
Dadweynow dhammaantiin
Iyo qaar kasii daran
Dawadani u leedahay
Iyo wiilal diinyari
Dusha inay marmariyaan
Bal maxaa diyaanada
Daawooyin jaankaan
Ubadkeenna dabadhigay?

Nin dundumo u qayshadey
Dalays wanadaydii
Anna waan ka dabaharay
In aan kula dagaalona
Intaasoo difeeta ah
haddii ay dubkoodii
Oo dumarka qaarki
Shaydaan u duufsaday
Weli door bidaayaan
iyo durinafaadiyo
Dusha lagu caddeeyaba

Waynaan dareemine
Miyay dollar lacageed
Dibadaha ka qaataan?

Xayaysiin daraadeed
Dalalkii sameeyiyo

Culumaa-u' -diinkiyo
Duqowdiyo wax`garadkiyo
Abwaannadii dalkaygiyo

Dadka waalidkaa iyo
Aqoonyahan digriiliyo
Qof kastoo damiirflow

Sidii gabar la doonoo
Haddii wiilki dibad jirey
Timihiina loo dabay
Daawooyin marisoo
Darxumiyo iyo ceeb iyo
Dibadda iyo gudahaba
Mayska daawanaynaa?

Diyaanadiyo Riikada
Daawooyin kale oo
Ganacsade dabbaalaa
Markii dawlad loo helo

Dareenkayga saan qabo
Laga waayo dumar kale
Daawooyin marisoo
Inta dibadda loo diray
Ragow yaanay idin dagin.

Xidid-keed u dadab galay
Dhegihi dalooshaday
Dalka gabadhi joogtana
Dubkeedii beddelan yahay
Dhaqan dooris weeyee
Ubadkeennan doorsamay

Iyo Durunafaadiyo
Dubka lagu beddelayaba
Dibadaha ka keenee
Halla dabagalaan iri

Haddii dunida oo idil
Gabar durunaafaa iyo
Dubka sare caddaysoo
Berked dalaq ku soo tiri

MMH Gaani, 1997